

Xaafadaha Safe Rest Village ee Multnomah,

Iyada oo sababtu tahay baahida sare ee loo qabo adeegyada, waxaa nagu waajib ah inaan uga jawaabno sida ugu dhakhsaha badan ee aan awoodno. Waxaa jira in ka badan 6,000 oo qof oo ku nool bannaanka, waana mas'uuliyadeena in aanu kula kulano halka ay joogaan. Si taasi loo gaaro, kooxda Hoyga Magaaladu waxay doonaysaa in ay ku dhawaaqdo in aanu **ballaarinayno Safe Rest Village ee Multnomah oo gaarsiinayno ilaa 100 guri.**

Waxaanu sameynaynaa wax kasta oo aan karno si wax ballaarintani looga dhigo guul ah. All Good NW iyo Magaalada Portland waxay isku waafaqsan yihiin baahiyaha taageero ee lagama maarmaanka u ah in goobtan laga dhigo guul ah.

Xubin ka tirsan kooxda Hoyga Magaalada iyo xiriiriye ka socda xafiiska Duqa Magaalada ayaa ka soo qayb gali doona oo joogi doona kulanka xiga ee Multnomah Neighborhood Association ee dhacaya Febraayo 13-keeda si loo wadaago isla macluumaadkaasi. Ha ka gaabsan in aad ku hakato oo weydiiso wixii su'aalo ah ee laga yaabo in aad hayso.

Waxaan soo diri doonaa macluumaadka cusub ee mashruuca inta wax socdaan, laakiin waxaad had iyo jeer mashruuca ka akhrisan kartaa website-kayaga ama email noogu soo diri kartaa su'aalaha shelterservices@portlandoregon.gov. Iskaan garee **code-ka QR** ama booqo SafeRestVillages.org wixii macluumaad cusub ah.



Streets to Stability

City Shelter Services Program
1120 SW Fifth Avenue, Room
901
Portland, OR 97204

